# Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta

Talada loogu talagalay Waaldiinta iyo Daryeeleyaasha.

## Caawinta Carruurta Hadalkoodu uusan Caddayn

1. **Ku celi waxa uu ilmuhu yiraahdo, laakiin dheh hadalka saxda ah.**
   Haddii uu ilmuhu si qalad ah erey u yiraahdo, iyaga ugu celi laakiin isticmaal dhawaaqyada hadalka saxda ah.
   Waxay tani muujinaysaa in aad adigu fahmayso waxayna baraysaa habka saxda ah ee loo yiraahdo.

2. **Ilmaha ha u sheegin in ay ku celiyaan ama kaa daba yiraahdaan ereyada**.
   Carruurtu waxay u baahan yihiin in ay degganaadaan oo ay kalsooni qabaan si ay iskugu tijaabiyaan dhawaaqyo cusub oo ay u wanaajiyaan hadalkooda.
   Waxtar ma leh oo ma caawinayso in diiradda la saaro qaladaadka oo ilmaha loo sheego in ay erayada ku celiyaan.

3. **Ilmahaaga kalsooni u yeel** in ay wadaxiriir sameeyaan ama dadka la hadlaan
   Haddii aad fahmayso qayb ka mid ah waxa uu ilmuhu yiraahdo, dib ugu celi ama ka daba dheh si aad u muujiso in ay wax fiican sameeyeen oo aad iyaga ugu dhiirrigeliso in ay hadalka sii wadaan.
   Isticmaal agabyada ama qalabaadka sida buugga dugsiga-guriga iyo sawirrada si aad iskaga caawiso in aad garato waxa uu ilmuhu oran karo.
   Waxay kuwani ku caawin karaan haddii hadalka ilmuhu uusan caddayn.

4. **Ha iska yeelin in aad fahmayso**
   Isku day in aad:
   - Su'aalo weydiiso.
   - Dhahdo "i tus..." oo ilmaha ku dhiirrigeli in ay farta waxyaabo ku fiiqaan.
     Haddii aadan fahmi karin, ilmaha u sheeg.
     Sasab ama niyadda u deji ka dibna kala hadal wax togan ama wanaagsan.

5. **Waxaa laga yaabaa in carruurtu ay dhawaaq dhihi karaan laakiin aanay ereyo ku sheegi karin.**
   Tani waa caadi. Tusaale ahaan ilmaha ayaa oran kara 's...' laakiin oran kara 'talaan' halkii salaan.
   Ilmaha ayaa u baahan in ay bartaan sida dhawaaqa loogu isticmaalo ereyada, taasoo waqti qaadan karta.

Habka ugu fiican ee loo caawiyo waa si sax ah oo loogu celiyo ereyada si ay u maqli karaan dhawaaqyada saxda ah.
Mararka qaar, dabiibka ama daawaynta hadalka ayaa loo baahan karaa.